



(Qofka Ilaahay la doono khayr diinta ayuu fahamsiiyaa

Mucaawiye Allaha ka raali ahaade wuxuu yiri: waxaan ka maqlay Nabiga scw isagoo dhahaya: (Qofka Ilaahay la doono khayr diinta ayuu fahamsiiyaa, anigu qaybiye ayaan ahay, Ilaahay ayaa wax bixiya, ummaddaani ka suulimayso inay xaqa ku taagan tahay mana dhibayso cidii khilaafta ilaa amarka Ilaahay yimaado.)

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu scw wuxuu sheegay qofka Ilaahay khayr la doono inuu ku irsaaqo fahamka diinta, Nabiguna scw uu yahay mid u qaybiya dadka waxa Ilaahay bixiyo ee risiq iyo cilmi iyo wixii kaleba, irsaaq bixiyaha dhabta ahina waa Ilaahay, wixii Ilaahay ka soo harayna waa asbaab aan waxba tarayn in Ilaahay u idmo maahee, ummaddaanina ka tagimayso inay amarka Ilaahay ku taagan tahay, mana dhibayso cidii khilaataa ilaa qiyaamuhu dhoco.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/5518>

النجاة الخيرية
ALNAJAT CHARITY

